

***Tell Them From Me* student survey:**

Information and consent form for parents and carers

Xograadinta ardayda Aniga iga sheeg (Tell Them From Me):

Foomka macluumaadka iyo ogolaanshaha waalidiinta iyo daryeelayaasha

Waalidiinta iyo Daryeelayaasha qaaliga ah

Teeramkan, dugsigayagu waxa uu ka qayb qaadanayaa *Tell Them From Me* (xograadinta ardayda Aniga, Iga Sheeg Iyaga). Sarfeygu waxa uu na siin doonaa jawaab celin qiimo leh oo ku saabsan waxa fikirka ardaydeenu ka qabaan noloshu dugsi, sida ay ugu hawlani yihiin dugsi iyo siyaabaha kala duwan ee macalimiintu ula falgalaan.

Sarfeygan waxa wada shirkad cilmi-baadhiseed oo madax-banaan, The Learning Bar, oo ku takhasustay sarfeyga dugsi.

Sido kale siinta dugsi ee jawaab celinta ardaydeena, sarfeyga waxa uu leeyahay ujeedo balaadhan. Waxay siisaa Department of Education (Wasaaradda Waxbarashada), iyada oo loo sii marayo Centre for Education Statistics and Evaluation (Xarunta Tirakoobka Waxbarashada iyo Qiimaynta), fikrado la xidhiidha samaqabka ardayga, ka qayb qaadashada, iyo dhaqamada waxbarid ee wixii leh ee horumarinta dugsi. Tan waxaa lagu sameeyaa iyadoo la adeegsanayo xogta ardayga aan la aqoonsan ee NSW oo dhan.

Sarfeygan ayaa ah mid **siir ah**, shaqaalaha dugsiyaduna ma awoodi doonaan inay arday gaar ah ka gartaan jawaabahooda.

Si loo xaqiijiyo sirta, ardayda ka qaybqaadanaya waxay heli doonaan yusarneem iyo baaswoodh. Macluumaadka waxaa la soo sheegaa kaliya marka shan arday ama in ka badan ay su'aal ka jawaabaan. Dhammaan macluumaadka waxaa loo maarayn doonaa si waafaqsan sharciga gaarka ah ee khuseeya. Xogta gaarka ah ee ardayda wasaaraddu ma siidayn doonto cid kale ama hay'ad kale oo aan ahayn sida sharcigu farayo. Ardayda gaarka ah laguma aqoonsan doono daabacaad kasta.

Sarfeygu waa online, wuxuu qaataa 15 ilaa 30 daqiiqo, wuxuuna ka dhici doonaa dugsi inta lagu jiro saacadaha dugsi. Waxaan heli doonaa warbixin ku saabsan natiijada sarfeyga dugsi ee waxyar ka dib markay ardaydeenu dhammeeyaan ra'yi ururinta.

Ka qaybqaadashada sarfeyga waa **ikhtiyaari**. Haddii su'aalo sahaamin ah ay ilmahaaga ka dhigaan mid aanay ku qanacsaneyn, ilmahaagu wuu ka boodi karaa su'aasha ama wuxuu dooran karaa inuu joojiyo ra'yi ururinta wakhti kasta.

Haddii aadan dooneynin in ilmahaagu/carruurtaadu ka qaybqaataan sarfeyga, fadlan buuxi foomka ku lifaaqan oo ku soo celi dugsi ka hor

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sarfeyga iyo cilmi-baarista waxaa lagu heli karaa Af-Ingiriisi xaga [education.nsw.gov.au/ttfm](https://www.education.nsw.gov.au/ttfm)

Maamule

Tell Them From Me Student Survey non-consent form
Foomka ogolaanshaha Xograadinta Ardayga ee Tell Them From Me

Haddii aadan dooneynin in ilmahaagu ka qaybqaato sarfeyga jawaab celinta ardayga, fadlan saxeex foomkan oo ku soo celi dugsiiga ka hor

Ma siinayo ogolaanshaha ilmahayga/carruurteyda inay ka qaybqaataan ***Tell Them From Me student survey*** (xograadinta ardayda Aniga laga Sheegayga).

Magaca Ardeyga 1

Fasalka xaadiriska ardeyga 1

Magaca Ardeyga 2

Fasalka xaadiriska ardeyga 2

Magaca Ardeyga 3

Fasalka xaadiriska ardeyga 3

Magaca Ardeyga 4

Fasalka xaadiriska ardeyga 4

Magaca Waalidka/xanaaneeyaha

Saxeexa waalidka/xanaaneeyaha

Taariikhda